
Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Kooras ku saabsan bulshada Finland


Sinnaanta ragga iyo dumarka ee Finland



# Maxaa loola jeedaa sinnaanta ragga iyo dumarka?

Sinnaanta ragga iyo dumarka waxaa loola jeedaa, in dhammaan labada jinsi ee ragga iyo dumarku ay leeyihiin isku xuquuq, isku waajibaad, iyo fursado ay nafsad ahaantooda hirgaliyaan, islamarkaana ay kaga qaybqaataan horumarka bulshada.

Bulshada ay dhexdeedu ka jirto sinnaanta, qofna lama takooro, taasoo loola jeedo in aan qofna loola dhaqmin si ka duwan sida dadka kale, iyadoo lagu salaynaayo jinsiga uu yahay. Sinnaanta labada jinsi waa xuquuq bani'aadminimo, taasoo ku salaysan heshiisyo iyo sharciyo qarameed.



# Sinnaanta labada jinsi iyo sharciga ee Finland gudaheeda

Sida uu dhigaayo dastuurka Finland, dadku waa ay u siman yihiin sharciga. Sidoo kale lama oggola takooris la xiriirta aqoonsiga jinsiga ama muujintiisaba. Ujeedada sinnaanta laga leeyahay waa sidii loo joojin lahaa takoorista ku salaysan xagga jinsiga, islamarkaana loo horumarin lahaa sinnaanta u dhexeysa ragga iyo dumarka, iyo in la hagaajiyo heerka dumarka ee gaar ahaan dhanka nolosha shaqada.

## Sinnaanta ragga iyo dumarka ee nolosha qoyska

Finland qof walba isaga ayaa go'aan ka gaaraya cidda uu la soconaayo iyo /ama cidda uu guursanaayo. Guurka khasabka ah lama oggola. Waxaana lagu guursan karaa da'da 18-sano. Labada qof waxaa ay wada noolaan karaan, iyaga oo aan isqabin. Labada qof ee is qaba ama wada nool waa siman yihiin. Furriinka waa arrin ku badan

Finland gudaheeda. Arrimaha carruurta la wada dhalayna si wadajir ah ayaa wax looga qabtaa xitaa furriinka kaddib. Finland gudaheeda waxaa jira qoysas noocyo kala duwan ah. Waxaa jira qoysas ka kooban hal ama laba waalid, sidoo kale waxaa jira qoysas isku jinsi ah. Sidoo kale Ragu waxay qabtaan howlaha guriga, taasoo loola jeedo in ay cuntada kariyaan, oo ay carruurta daryeelaan.

## Fikradaha laga qabo jinsiga

Fikradaha la qabatimay ee labada jinsi, sida waxyaabaha laga filaayo iyo waxyaabaha laga aaminsan yahay ragga iyo dumarka ama wiilasha iyo gabdhaha ee la xiriira dabeecadaha iyo habdhaqanka, ayaa ah kuwa saameyn ku yeelanaaya hirgelinta sinnaanta. Fikradaha la qabatimay waxaa ka mid ah tusaale ahaan, fahamka ah nooca cayaarta ilmaha ee ku haboon wiilasha iyo gabdhaha. Dadku waxaa ay u haystaan in boombalaha caruusadda uu yahay mid ku haboon in ay gandhuhu ku ciyaaraan, halka wiilashana ay ku haboon tahay in ay gawaarida yaryar ku ciyaaraan, ama in ay jiraan xirfado gaar ah ama howlaha guriga oo gaar ah, kuwaasoo ragga ama dumarku iska leeyihiin.

Fikradaha la qabatimay waa kuwo xaddidaaya doorashada ilmaha iyo dhallinyarada iyo waliba fahamka ay nafsad ahaantooda ka haystaan. Sidoo kale waxaa arrinkaas uu dhibaato ka soo gaarayaa kuwa xagga jinsiga laga tira badan yahay. Fikradaha la qabatimay ee dhibaatada leh waxaa baabi'in kara tusaale ahaan, waalidka, xannaanada, macallimiinta iyo warbaahinta.

## Sinnaanta ragga iyo dumarka ee dhanka waxbarashada

Finland gudaheeda wiilasha iyo gabdhaha waxay dhigtaan isku iskuul, halkaasoo ay dhammaan maadooyinka isla qaataan. Sinnaanta waxbarashada waxaa loola jeedaa, in ragga iyo dumarka ku jira xerada qaxootiga ay leeyihiin xuquuq isku mid ah oo ku saabsan tusaale ahaan in ay bartaan luqadda finishka.

Finland waxbarashada xirfadeed iyo midda tacliinta sareba, waxaa loo kala qaybiyay jinsi ahaan waxa loogu yeero laamaha waxbarasho ee ragga iyo dumarka. Finland gudaheeda dumarku heerka waxbarashada waa ay ka sarreeyaan raga.

# Sinnaanta ragga iyo dumarka ee dhanka shaqada

Finland ragga iyo dumarku si isku mid ah ayay shaqada u tagaan. Dumarku waxay shaqada sii wadaan, xitaa marka ay carruur dhalaan kaddib. Ragga iyo dumarka isku si ayay u isticmaali karaan fasaxa waalidka Finland gudaheda. Waxaana Finland gudaheeda ka jira nidaam guud oo ku saabsan daryeel maalmeedka ama xannaano maalmeedka carruurta.

Mushaarka iyo gunnooyinka waxaa qof walba loo siiyaa si shakhsi ahaaneed. Xitaa canshuur bixinta waa mid shakhsi ahaaneed. Sidoo kale howlgabka waa mid shakhsi ahaaneed, Ragga iyo dumarkana waxaa ay leeyihiin howlgab isku mid ah.

Finland gudaheeda suuqyada shaqada waxaa ay si xoog leh ugu kala qaybsameen shaqooyinka ragga iyo dumarka. Tani waa dhibaato xoog leh, taasoo qayb ahaan gacan ka gaysanaysa sii jiritaanka fikradaha la qabatimay iyo sinnaan la'aanta dhanka nolosha shaqada, tusaale ahaan dhanka mushaarka. Finland gudaheeda dumarka waxaa la siiyaa mushaar 16% ka yar kan ragga la siiyo, inkastoo sida sharcigu dhigaayo ay tahay, in shaqada isku midka ah  la bixiyo mushaar isku mid ah.

Sida sharcigu dhigaayo qof shaqaalaha ka mid ah laguma takoori karo in uu uur leeyahay ama waalid yahay awgeed. Qofka shaqada loogama ceyrin karo in uu uur yeeshay ama qaatay fasaxa qoyska awgeed, arrimahaasna ma ahan kuwo saameyn ku yeelan kara shaqo helitaanka.



# Dagaalka ku salaysan dhanka jinsiga

Dumarka waxaa ay dagaal kala kulmaan dhammaan wadamada dunida, dhaqamada iyo dabaqadaha bulshada. Xitaa dalka Finland gudihiisa. Dagaalka dumarka lagu qaado waa jebin la jabinaayo ama dambi laga galaayo xuquuqda ban'iaadamka

Waxaa dhici karta in haweeneydu ay jinsi ahaanteeda awgiis dagaal kala kulanto dhammaanba heerarka kala duwan ee nolosha. Waxaana si gaar ah ay dumarku dagaalka kala kulmaan lammaanaha ama qoyska dhexdiisa. Fal sameeyuhu inta badan waa qof ay macrifo yihiin, tusaale ahaan saaxiibkeed hadda ama kii hore. Dagaallada ragga soo mara ama gaara, falsameeyaha inta badan waa qof aan la garanayn oo qariib ah. Dagaalka soo waajaha dumarka waxaa kam id ah tusaale ahaan:

- Wax ku dhafasho, garaacis, timaha oo laga jiido ama jirdilis kale
- Gabdhaha oo si xun loola dhaqmo ama waxbarashada oo loo diido
- Dagaalka lamaannaha ama xirirka sokeeye
- Dagaalka jinsiga (kufsi) ama faraxumayn
- Ka ganasiga dadka ama dhillaysi
- Jarjarista xubinka taranka
- Dagaalka la xiriira sharafta ama guur ku khasabka.

Dambiyada dagaalka ama kuwa xagga jinsiga ah waa dambiyo Finland gudaheda lagu mutaysan karo ciqaab. Sidoo kale waxaa dambi ah in carruurta la mariyo ciqaab jir ahaaneed. Qof walba isaga ayaa go'aan ka gaari kara cidda jirkiisa taaban karata iyo qaabka ama sida loo taaban karo.

**Qashqashaadda jinsiga** waxaa loola jeedaa, habdhaqanka jinsi ahaaneed ee uusan qofku rabin ee hadal ama hadal la'aanta ah, ama taabashada ah, taasoo lagu dhaawacaayo qofka maskax ahaan ama taabsho la'aanta jirkiisa. Waana arrin ah dagaal qofka loo gaystay.

**Qashqaashaadda ku salaysan xagga jinsiga** waa kuwo la xiriira jinsiga shakhsiga, aqoonsiga jinsi ahaan ama u muujita jinsi ahaan ee habdhaqan jinsi oo aan la doonayn, taasoo dhaawac loogu gaysanaayo qofka maskax ahaan ama taabsho la'aanta jirkiisa.

**Qashqashaadda ku salaysan xagga jinsiga ama faraxumaynta jinsiga, waa arrimo aan sharcigu ogoleyn oo mamnuuc ah. Xitaa xerada qaxootiga dhexdeeda lama oggola arrimahaas. Diidmadaasna waa mid khuseysa macaamiisha iyo shaqaalahaba.**

# Macluumaad dheraad ah:

Guriga Finland -Waa mashruuc  ah fiidiyoow ka hadlaaya arrimo ku saabsan bulshada Finland. Mid ka mid mowduucyada fiidiyoowgu ka hadlaayo ayaa ah  xuquuqaha bani'aadamka, sinnaanta iyo cadaladda.

Fiidiyowga ka hadlaaya mowduucaan waxaa ka heleysaa Youtube-ka:

**https://www.youtube.com/c/KotonaSuomessa/playlists**

Fiidiyoowga waxaa lagu daawan karaa luqadaha soo socda: finnsih, iswidish, ingiriis, carabi, dari, kurmandzi, somali, sorani, tthaylaandi, shiinaha, faransiiska, istooniya, tigrinya iyo ruush.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service